

# Isbeddello ayaa ku imaanaya Lake Street/Boosteejada Midtown!

Lake Street/Boosteejada Midtown waa saldhigga ugu mashquulka badan ee METRO Blue Line ee woqooyiga garoonka diyaaradaha, iyadoo ku dhawaad 800,000 oo rakaab ah ay raacaan sannadkii. Maaddaama xaruntu ay ku dhawdahay 20 sano oo adeeg bixin ah, horumarino isdaba joog ah ayaa kor u qaadi doona khibrada macaamiisha iyo bulshada ku xeeran. Casriyeyntan waxay ujeedadeedu tahay in la horumariyo marin u helka, badbaadada, iyo waaraanka, iyada oo loo abuurayo jawi soo dhaweeya dadka oo dhan.

Jidka 21 wuxuu uu kaga dhacaa METRO Blue Line boosteejada waxuuna noqday sida goobta rakaabka ugu badan ay ka raacaan. Boosteejada tareenada korontada waa barta isku xirka muhiimka ah ee mustaqbalka METRO B Line.

## ***Hadafka cusboonaysiinta boosteejada***

- **Helitaanka:** Hubinta in qof walba, iyada oo aan loo eegin awoodiisa, ay si fudud u soo mari karaan Lake Street si ay u imaadaan goobta laga raaco tareenka ku shaqeeyo korantada. Bixinta wiishka lagu socdo, balaarinta jaranjarooyinka, meelo ay ku socdaan dadka gaariga cagoolaha wato, iyo dib u rarida jaranjarada si loo hagaajiyo muuqaalka iyo iftiinka.
- **Waayo-aragnimada Macaamiisha:** ku jiraan badqabka, nalka dheeraadka ah ee laga gol leeyahay qurxinta, xarunta adeegga gaadiidka, calaamadaha dadka lagu hagayo, meelo xiran, iyo adeegyo kale.
- **Waarida:** Isticmaalka walxo raagaya oo ay fududahay in la ilaaliyo isla markaana kaydiyo tamarta.
- **Naqshad Isku-dhafan:** Si aan kala go' lahayn ugu xidhida boosteejada iyo meelaha u dhaw sida Market Square iyo waddooyinka tareenada ee dhaw.

## **Waqtiga**

• 2022-2023

**QORSHAYNTA**

• 2024-2025

**NAQSHADA & INJINEERNIMADA**

• 2026-2027

**DHISMAHA BOOSTEEJADA**

Inta u dhaxaysa 2026 - 2027, boosteejadu waxa lagu samayn doonaa dayactir wayn. Mashruucani wuxuu la jaan qaadayaa waddooyinka socda iyo horumarinta muuqaalka isgoyska Hiawatha-Lake iyo hagaajinta METRO B Line. Qorshayntu waxay bilaabatay 2022, waxaana hadda ku jirnaa wejigii naqshadeynta.

## Hawlaha Dhaw iyo kuwa Mustaqbalka


Metro Transit waxa ay qabatay ra'yì uruurin xagaagii 2024 kaas oo bixiyay war-celin qjimo leh oo ku saabsan adeegyada boosteejadaa iyo Gogosha u furan dadka oo dhan Oktoobar 2024 (ka fiiri websaydka mashruuca wixii ah warbixinada falgalka ah ee ra'yì uruurinta iyo gogosha u furan dadka oo dhan labadaba). Talooyinka la soo uruuriyay waxay hagi doonaan go'aamada marka aan ka gudubno marxaladaha naqshadeynta.



## Horumarinada Boosteejada ee Socda

Iyadoo dayactirka weyn loo qorsheeyay 2026 - 2027, dhowr horumar ayaa hadda dhaxda marayo:

- Dayactirka wiishka iyo jaraanjarada socoto
- Ku samaynta farshaxan goobaha caamka ah
- Xoojinta Amniga Goobta
- Dayactirka dhalooyinka iyo shubka
- Nadiifinta qotada dheer iyo dayactirka



## Akhbaaraadka mashruuca

Ka ogow wax badan oo ku saabsan mashruuca, sida akhbaaraadka ka soo cusboonaado iyo fursadaha aad kaga qayb qaadan karto naqshadaynta, adigoo booqanaya [metrotransit.org/hilake](http://metrotransit.org/hilake).

### CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:

Kevin Murray  
[hilake@metrotransit.org](mailto:hilake@metrotransit.org)  
763-337-0885

